Autismeforeningen
I NORGE

# JAADADKA AWTIISMAHA

## - hordhac kooban

# Jaadadka awtiismaha

Jaadadka awtiismuhu waa noocyo awtiisme ah oo kala duwan oo haddana isu dhow. Jaadadka awtiismaha waxaa caalami ahaan loo soo gaabiyaa ASD (Autism Spectrum Disorders), weertaas ayaana hadda Norway loogu yeeraa.

Farqi weyn ayaa u dhexeeya dadka qaba ASD. Astaamaha iyo caqabadaha kala duwan iyo weynaantoodu inta ay gaarsiisan tahay way kala duwan tahay oo qofba waa si.

Da'da, jinsiga, heerka garaadka iyo waxyaalaha dheeriga ah ee qofka ku adag ayaa ayaguna micne samaynaya. Dad badan oo ASD qaba ayaa u nugul in ay la soo darsaan dhibaatooyin kale sida xanuunno maskaxiyan ah, qallal iyo hurdala'aan.

# Astaamaha lagu garto ASD:

- Tayada awooddooda dhexgalka iyo la dhaqanka bulshada oo dadka kale ka duwan
- Xiisahooda oo xaddidan ama kooban
- Badnaanta firfircoonidooda oo xaddidan
- Hab isku mid ah oo mar walba wax loo qabto
- Caqabado ka jira la dhaqanka iyo fahanka bulshada
- Xiisaha iyo awoodda dhexgalka bulshada oo xaddidan
- Dhugasho ka duwan dadka kale
- Hab falcelin oo ka duwan midka dadka kale
- Caqabado ka jira xiriirka dadka iyo luuqadda
- Habdhaqan ka duwan midka dadka kale
- Waxyaalaha lagu dareemo dareemayaasha oo loo arko si ka duwan dadka kale
- Istareeska oo loo nugul yahay in ka badan dadka kale

# Jiritaanka

Waxaa sanadihii u danbeeyay sii badanayay tirada dadka lagu sheegayo ASD. Taas oo inta badan sabab looga dhigo cudur-sheegidda oo sidii hore ka fiican, weliba midda dadka astaamaha fudud leh. Waxay cilmibaaristu na tusaysaa in boqolkii qof ba mid in uu soo gelayo dadka qaba jaadadka awttiismaha.

Qiyaastii wiilal afar jeer ka badan gabdhaha ayaa lagu sheegaa jaadadka awtiismaha. Sababta aan gabdhaha loogu sheegin ayaa ah in ay yar yihiin dhibaatooyinka muuqda ee ay nolol maalmeedka la kulmaan, oo sidaas darteed ayaan inta badan laga baarin ASD. Waxaa jira dad ku andacooda in tijaabooyinka iyo habka cudursheegidda ee hadda jira in ay yihiin kuwo diiradda saara «calaamadaha wiilasha» sida u dhaqmidda si aan qofku xad lahayn, xanaaqa, habdhaqanka hal wax lagu celcelinayo iyo xiisaha waxyaalaha gaarka ah.



# Sababta

Sababaha keena ASD si buuxda looma oga. Waxaa la isku raacsan yahay in ay waxyaalaha la kala dhaxlo kaalin weyn ka ciyaaraan, iyo in habdhiska dareemayaashu keeni karaan isbeddel silloon iyo dhibaato xagga fahamka ah, kuwaas oo loogu yeero dhibaatooyinka xagga garaadka. Xaaladaha cilminafsiga iyo kuwa bulshada, dhacdooyin gaar ah oo carruurnimadii lala kulmay ama tallaallada midkoodna ma keenaan ASD.

# Calaamahada iyo astaamaha

Astaamaha goor hore lagu garto ASD waxaa tusaale ahaan ka mid noqon kara dhaqdhaqaajinta jirka/gacmaha oo yar, dhugashada oo ah mid ka duwan sida dadka kale ama hadalka oo soo daaha. Da'dii la doonaba ha la ahaadee, hadalka ama aqoonta bulshada oo la hilmaamo ama horummar samayn waaya ayaa ayaguna ahaan kara astaan lagu garto.
Mararka qaarkood ayaa goor hore la ogaan karaa calaamadaha ASD, taas oo keenta in ilmaha cudurka lagu sheegi karo markuu jiro laba-saddex sano. Laakiin waxaa dhici karta in astaamuhu aanay aad uga muuqan carruurta kuwooda yaryar, aad ayayna carruurtu u kala duwanaan karaan. Sidaas darteed ayay mararka qaar adkaan kartaa in carruurta kuwooda ugu yaryar cudurka loogu sheego si hubanti ah.

Dadka qaba ASD ee sida fiican u dhaqma waxaa laga yaabaa inuusan korriinkoodu wax badan dadka kale ka duwanayn marka ay yar yihiin. Calaamadaha ayaa si fiican u soo bixi kara markay carruurnimada ka baxaan ama dhallinyaro noqdaan oo looga baahdo inay yaqaannaan sidii ay dadka ula bulshayn lahaayeen oo u fahmi lahaayeen xeerarka wada-noolaashada bulshada ee isku dhafan.




Dhab ahaantii aad bay u kala duwan tahay hadba da'da si hubanti ah qofka cudurka loogu sheegi karo. Gabdhaha waxaa inta badan cudurka lagu sheegaa horraanta da'da dhawr iyo toban jirka ama da'daas kaddib. Sabab taas keenta ayaa waxay tahay inay gabdhuhu aalaaba wiilasha uga fiican yihiin xiriirka dadka, markay caqabado la kulmaanna alaa intay aammusaan ayay is xirxiraan.

# Cudursheegidda

Ma jiraan tijaabooyin ama baaritaanno lagu caddayn karo in uu qofku qabo cudurka ASD iyo in kale. Waxaa cudursheegidda lagu saleeyaa qiimayn lagu sameeyo habdhaqanka qofka. Qiimayntu waxay ku timaaddaa kormeer qotadheer iyo u kuurgelid si nidaamsan loo sameeyo. Baaritaanka cudursheegidda waxaa samaynaya koox aqoon kala duwan leh oo ka socota adeegga caafimaadka khaaska ah, kuwaas oo inta badan ka yimaada adeegga baxnaaninta ama daryeelka caafimaadka nafsiyanka ah – kaddib marka uu dhakhtarka joogtada ah qofka soo gudbiyo.

# Waxqabad iyo isu duwid

Waa in goorta ugu horreysa ee suurtaggalka ah loo billaabaa waxbarid iyo tababbar qofka gaarkiisa loogu talo galay – xataa marka looga shakisan yahay ASD ee aan weli cudurka lagu sheegin.

Waa in lala xiriiro Adeegga cilminafsiga waxbarashada (PPT) si loogu kuurgalo kartida ilmaha oo loo siiyo deeq dhammaystiran oo ilmaha ku habboon. Waa in ay waxbaridda ku jiraan aqoon baraatiko ah iyo mid bulsho oo ay la socdaan maaddooyinka iskoolka ee caadiga ah, waana in ay ku salaysnaadaan xiisaha ardayga gaarka ah iyo meelaha uu ku fiican yahay. Waxaa inta badan lagama maarmaan ah in loo qabto shaqaale dheeri ah iyo waxqabad ilmuhu ku helayo waxbarid khaas ah si ardayga gaarka ah waxbarashada loogu fududeeyo.

Ardayda la siiyo waxbarashada khaaska ah waa in ay leeyihiin qorshe waxbarasho oo gaar ah (IOP). Kaas oo lagu qorayo hadafka iyo waxa ay waxbariddu ka kooban tahay, dadka ka qaybqaadanaya iyo sida laysugu dubaridayo. Iskoolka oo wadsahaqayn la yeelanaya waalidka iyo haddii ay suurtaggal tahay ardayga laftiisa, ayaa diyaarinaya IOP ku salaysan qiimayntii khabiirka ee PPT.

Dadka qaba ASD waxay u baahan yihiin adeegyo isu duwan oo muddo dheer soconaya. Dadka isticmaala adeeg caafimaad- iyo daryeel oo labo adeeg ka badan waxay xaq u leeyihiin qorshe qofka gaar u ah (IP). IP wuxuu sidoo kale qofka xaq u siinayaa isu duwe ay degmadu u qabato. Waxaa isu duwaha laga rabaa in uu la socdo oo isku duwo deeqaha adeegga ee qofka loo fidiyo.

# Dad khalad laga fahmay

Dadka ASD qaba caadiyan muuqaal ahaan kama duwana dadka kale. Taas oo adkaynaysa in ay dadka ku xeeran fahmaan sababta ay ugu dhaqmaan si dadka kale ka duwan. Dadka qaba ASD markay dhawr wax isku mar la kulmaan waxaa ku adkaata sidii ay wax u kala sooci lahaayeen oo u kala hormarin lahaayeen. Khalad baa inta badan laga fahmaa oo waxaa loo arki karaa in aysan xushmad lahayn oo edeb daran yihiin.

Hawlaha nololmaalmeedka ayaa ku adkaan kara maaddaama ay u nugul yihiin istareeska, waxyaalaha looga baahan yahay, qaylada iyo cambaaraynta. Qaar badan ayaa waxaa ku adag qorshaynta iyo isku dubarridka, taas oo loogu yeero dhibaatooyinka awoodda fulinta.

Maaddaama ay adag tahay in la qiimeeyo waxa uu awoodo qof ASD qaba ayaa waxaa dhici kara in qofkii laga doono wax ka badan ama ka yar intii loo baahnaa.

# Baaritaan iyo aayaha cudurka

Cudurka oo goor hore la ogaado, in warbixin la siiyo dhammaan dadka arrintu khuseyso, waxyaalaha laga doonayo oo ah kuwo ku habboon iyo caawin wanaagsan ayaa ah tiirarka ugu muhiimsan ee waxqabadyada muddada dheer soconaya. Marka uu adeegga caafimaadka khaaska ah baaritaanka dhammeeyo, waxaa muhiim ah in waalidka ilmaha, ama qofka laftigiisa loo sheego xuquuqda ay yeelan karaan.

In marka la korayo la helo caawin sax ah, fududayn iyo waxbarasho qofka ku habboon ayaa muhiim u ah sidii aayaha cudurku u wanaagsanaan lahaa, si loo noqdo qof sida ugu badan ee suurtaggalka ah isugu filan oo loogu noolaado nolol wanaagsan. In caawin hadafka ku beegan goor hore la helo ayaa yarayn karta niyadjabka iyo dhibaatooyinka nafsiyanka ah ee kale ee ka imaan kara falcelinta laga samaynayo dunida iyo waxyaalaha qofka looga baahan yahay.

Dadka ASD qaba intooda badan waxay noloshooda oo dhan u baahan yihiin waxqabad iyo caawin. Isbeddello yaryar oo nolosha ku yimaada ayaa cawaaqib weyn ku yeelan kara tayada noloshooda. Si ay waxqabadyadu qofka uga caawiyaan in uu helo nolol wanaagsan oo waarta waa in ay ahaadaan kuwo qorshaysan, si wanaagsan loo diyaariyay, soconaya oo dhammaystiran.

# Ururka awtiismaha

Xubin ka noqo

Ururka awtiismaha ee Norway (AiN) waa urur ka shaqeeya danaha dadka qaba jaadadka awtiismaha, waalidka/dadka mas'uulka ka ah, dadka u dhow, khubarada iyo dadka kale ee daneeya. Ururku dhexdhexaad ayuu ka yahay siyaasadda xisbiyada, diinta, dhinaca loo janjeero xagga galmada iyo jinsiyadda laga soo jeedo.

AiN waddanka oo dhan ayuu ka dhisan yahay, gobollada oo dhanna farac ayuu ku leeyahay. Faracyo badan ayaa dadka yaryar iyo kuwa waaweyn ee qaba ASD iyo qaraabadooda waxay u fidiyaan wadahadal-iyo dad ay isku xirmaan. Faraca meesha aad ku nooshahay ayaad weydiin kartaa warbixinta firfircoonida aaggaaga ka jirta.

Ururka awtiismuhu wuxuu rumaysan yahay in si dadka qaba ASD loogu abuuro nolol wanaagsan in ay lagama maarmaan tahay in loo fidiyo deeq qofka gaarka ah ku habboon kuna salaysan qorshayn dheer, dhammaystiran oo waajib ah, deeqdaas oo la helayo dhammaan marxaladaha nolosha – ayada oo si gaar ah xoogga loo saarayo xilliyada kalaguurka ah. Waxaan ka shaqaynaa in qof walba, ayada oo ku salaysan xiisaha qofka iyo waxa uu awoodo, in uu helo fursad uu bulshada uga qaybqaato si la mid ah dadweynaha kale.

Bogga www.autismeforeningen.no waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan ASD, xuquuqaha iyo ururka. Waxaad sidoo kale halkaas ka helaysaa warbixin ku saabsan koorsooyin iyo seminaarro, wararka ku saabsan ASD iyo cilmibaaris. Waxaa kale oo aad halkaas ka helaysaa xiriirka wakiillada iyo dad kula mid ah ee meesha aad ku nooshahay.



Autismeforeningen
I NORGE

Xoghaynta: 23 05 45 70
Maalin walba inta u dhexaysa saacadaha 9-15

Teleefoonka hagista: 23 05 45 72
Isniin, arbaco, khamiis, saacadaha 10-14

Ciwaanka booqashada – iyo waraaqaha:
Wergelandsveien 1-3
0167 Oslo

post@autismeforeningen.no
www.autismeforeningen.no